AUTISMFORUM
Handikapp & Habilitering, Box 17519, 118 91 Stockholm
08-690 60 52, www.autismforum.se, autismforum@sll.se

Stockholms läns sjukvårdsområde

1/9 2004

Warbixin hordhac ah oo ku saabsan cudurka nafsaaniga ah ee loo yaqaan autism

Cinwaanka asalka ama orijinaalka: Introduktion om autism

Eric Zander

Turjumaadda: Badil Sahardid Mahmoud, 2005

Cudurka nafsaaniga ah ee autism waxa lagu yaqaannaa in uu weerarro khatar ah oo weyn ku qaado qaybo badan oo muhiima oo qaabbilsan kobcidda ama koritaanka: Waxa adkaata in qofka cudurkaasi qabaa uu dadka la xidhiidho ama dadku ay isaga xidhiidh la yeeshaan (sida; Israacidda dadka iwm), xidhiidhka hadalka, iyo hannaanka iyo awoodda wax cabiridda. Si loo baadho cudurka nafsaaniga ah ee autism, waa in la muujiyaa hannaanka calaamadaha ee lagu yaqaanno dhammaan arrimahan xagga sare lagu soo sheegay ka hor ilmuhu inta aanu gaadhin saddex jir. Xitaa waalidiintu haddii ay ogaadaan in ilmaha ay wax ka khaldan yihiin isla marka uu muujada yahay, aad bay u adagtahay in shaybaadh lagu sameeyo cudurka nafsaaniga ee autism ka hor inta ilmuhu aanu gaadhin da'ada siddeed iyo toban jirka.Taas oo ku xidhan hannaanka kala duwen ee loo adeegsanayo baadhitaanka lagu ogaanayo koboca ama horumarka ilmuhu uu samaynayo, taas oo si cad oo muuqata aan u soo shaac baxayn ka hor ilmuhu inta aanu gaadhin da'ada xagga sare lagu soo sheegay.

Badanaa carruurta qabta cudurka nafsaaniga ah ee autism intooda badani xagga maskxada aad ugama koraan, laakiin carruur aan tiro badnayn ayey xaaladdoodu iska caadi tahay. Qaar badan ayaa xitaa qaba cudurka suuxidda ama sarcada, waxa kale oo dadka cudurka autism qaba ku badan dadka indhaha iyo dhegaha la'. Dadka qaba cudurka loo yaqaan (Aspergers syndrom) oo la mid ah cudurka autism, ayey xaaladoodu iska caadi tahay.

Qiyaas si taxaddir ah loo sameeyey ayaa muujinaysa in kunkii qofba 1-2 qof ay qabaan cudurka nafsaaniga ah ee autism, taas oo micnaheedu yahay in sannad kasta Iswidhan ay ku dhashaan qiyaastii boqol carruur ah oo qaba cudurka autism. Haddii la tiriyo dadka qaba cudurka nafsaaniga ah ee autism iyo xaaladaha kale ee cudurkaas la midka ah ee (autismliknande tillstånd), ama haddii si kale loo yidhaa dhammaan shay baadhyada lagu sameeyey cudurradaasi, waxay muujinayaan in ugu yaraan kunkii carruur ahba 6 carruur ahi ay qabaan cudurkaas marka la eego dhammaan carruurta Iswidhan ku nool. Tiro intaas leeg oo carruur ah ayaa iyaguna cudurkaasi qaba waddamada kale ee adduunka. Wiilasha qaba cudurka nafsaaniga ah ee autism ayaa ka badan gabdhaha cudurkaasi qaba.

Maxaa u sobob ah ama keena cudurka nafsaaniga ah ee autism?

Cudurka autism wuxuu la xidhiidhaa hannaanka uu qofku u dhaqmo (waxa la qeexay hannaanka uu qofku u dhaqmo), laakiin waxa u sobob ah arrimo badan oo baayoolajiyeed oo

sal ku leh khal-khal xagga maskaxda ku dhaca, arrimahaas oo qaarkood la garanayo qaarkoodna aan la garanayn, kuwaas oo is baddel ku sameeya koritaanka awodda maskaxda ee ku shaqada leh maaraynta macluumaadka. Marar badanna cudurka waxa sobob u ah arrimo la xidhiidha hannaanka hiddaha ee la kala dhaxlo. Siyaabaha kala duwen ee loo maareeyo ama loo maamulo macluumaadka, tusaale ahaan marka laga hadlayo helidda, maaraynta iyo turjumashada macluumaad ah, barashada waxyaabo cusub iyo hab dhaqanka waafaqsan hadefka la leeyahay, ayaa waxay keenaan hannaan kala duwen oo loo fiirsan karo.

Sidee lagu gartaa cudurka autism?

Xidhiidhka bulsheed ee uu qofku dadka la yeelanayo iyo sidoo kale xidhiidhka dadku ay qofkaas la yeelanayaan ”sida israac-raaca iwm”

Dhibaatooyinka ku saabsan xidhiidhka bulsheed ee uu qofku dadka la yeelanayo iyo sidoo kale xidhiidhka dadku ay qofkaas la yeelanayaan ”sida israac-raaca iwm” ayaa ah ta badanaa ku cad ee ka muuqata cudurka autism. Isla marka ilmuhu uu aad u da’ yaryahayba waxa ku adkaan kara isticmaalka iyo fahmidda xidhiidhka xagga indhaha, shucuurta laga muujiyo xagga wejiga ”sida haddii qof cadhaysan yahay imlmaha cudurkaas qabaa wejiga qofka kama garan karo”, dhaq-dhaqaaqa xagga gacmaha iyo madaxa, Laxniga codka ee kala duwen ”sida haddii qof ku hadlo hadal cadho ah ama hadal qabow ilmaha cudrkaas qabaa ma kala garanayo iyo waxyaabaha la midka ah” marka dadka kale lala xidhiidhayo. Carruur fara badan oo qaba cudurka autism ayaan dadka raaci karin iyagana aan la raaci karin isla markaana waalidkooda aan la qaybsan waxyaabaha lagu farxo ama waalidkoodu in uu sasabo aan ka codsan. Carruuta qabta cudurka autism had iyo jeer ma xiiseeyaan carruurta ay isku da’da yihiin, laakiin haddii ay isku dayaan, waxa ku adkaata in ay helaan saaxiibo oo saaxiibtinimadoodana ay sii wadaan.

Xidhiidhka

Dadka qaba cudurka autism waxa ka habsaama ama ka maqnaada awoodda hadalka, taas oo aanay ku baddeli karayn in ay adeegsadaan waxyaabaha kale ee aan luqadda ahayn ee lagu wada xidhiidho. Qiyaastii kala badh carruurta qabta cudurka autism ayaan marnaba bilaabin in ay hadlaan. Carruurta sidaasi ah waxa u dhaxeeya faraq weyn. Qaar carruurtaas ka mid ah ayaa erayo gaar ah uun adeegsada. Kuwa kalena waxay isticmaalaan erayo fara badan iyaga oo si sax ah u hadlaya, laakiin inta badan ku cel-celinaya weedha ay ku hadleen ama kaga dayanaya hadalada ay dadka kale yidhaahdeen oo xaaladda markaas aan waafaqsanayn. Koox yar ayaa iyagu ku hadla luqad fiican oo heer sare. Arrinta ay dhammaantood ka wada siman yihiin waxa weeyi, waxa ku adag in ay bilaabaan wada xaajood dabadeedna ay sii wadaan, iyaga oo weliba uu ku adag yahay fahanka luqaddu. Gaar ahaan waxaanay ku wanaagsanayn fahanka luqadda lagaga hadlayo arrimaha adag. Xitaa qaar kuwaasi ka mid ah oo yaqaan erayo aad u badan oo deg-degna ugu hadla, waxa caadi u ah in ay xaraf-xaraf ahaan (weedh ahaan uun) hadalka qofku kula hadlayo uga fikiraan.

Hannaanka

Carruurta qabta cudurka autism badanaa waxay leeyihiin hannaan dhowr ah oo xadeysan, waxyaabaha ay xiiseeyaan iyo hawlaha firfircoonida ah ee ay ka shaqeeyaan waxay u qabtaan si hab keliya oo ku cel-celis uun ah. Tusaale ahaan arrimahaa waxa ka mid ah: In si isdaba joog ah loo wado hawlaha firfircoonida ah; sida ku wareegeysiga taayirrada ku yaalla baabuurka lagu ciyaaro, ama in laysku xidhxidho oo laysdaba gel-geliyo dhammaan alaabta lagu ciyaaro iyada oo marka la dhameeyo haddana sidii oo kale loo samaynayo, laakiin aan si deg-deg ah loogu ciyaarin alaabada aartifishalka ah iyo ciyaarta sida masraxiyadda ah oo kale. Waa caadi in alaabo kala duwen laysku hagaajiyo, ama mararka qaarkood alaabo kadeed badan iyo hab wax loo qabto oo ay qasab tahay in marar badan lagu cel-celiyo oo si isku mid ah uun loo qabto. Haddii qofka qaba cudurka autism ay ku yimaaddaan waxyaabo dhaafsan waxyaabihii iyo hawlihii la baray, taasi way ku adkaataa waxayna ku keeni kartaa quusasho ama rajo go' iyo xanaaq. Sideedaba isbeddel kasta, sida shay laga baddelay meeshii uu hore u yaallay ama wax loo qabto si ka duwen sidii caadiga ahayd ee loo qaban jirey ayaa taasi waxay ku adkaan kartaa qofka qaba cudurka autism. Gaar ahaan carruurta ay maskaxdoodu aad u fiican tahay marka ay gaboobaan waxay ku mashquulaan uun dhinac keliya oo ah " dantooda" sida jedwellada tareenka ama basaska, taariikhaha dhalashada ee dadka kale, tirada dadweynaha suuqyada Iswidhan iwm.

Marka laga yimaaddo hannaanka lagu ogaaday baadhitaanka ee ka mid ah saddexda qaybood ee xagga sare lagu soo sheegay, ayaa waxa kale oo weliba caadi u ah cudurka autism: Tusaale ahaan qofka oo xasaasiyad dheeraad ah ama aad u hoosaysa ku yeesha codadka dhawaaqyada qaarkood, taabashada, urta iwm, xilliyada la qabanayo hawlaha firfircoonida saa'idka ah, hurdada iyo dhibaatada xagga cuntada iyo waxyaabaha la midka ah. Waxyaabahan aan soo sheegnay midkoodna uma baahna in lagu sameeyo baadhitaan ah cudurka autism.

Kala duwenaansho weyn

Dadka qaba cudurka autism badanaa siyaabo badan ayey aad ugu kala duwen yihiin, laakiin qabitaanka qofku uu qabo cudurka autism ayaa ah had iyo jeer mid khatar ah. Tusaale ahaan, heerka cudurka autism waxa la odhan karaa wuxu iska baddelaa mid adag ilaa mid fudud, sidoo kale heerka awoodda ayaa iska baddeli karta cillad adag oo qoto dheer oo xagga maskaxda ah iskuna baddeli karta oo noqon karta mid ka baxasn oo dhafsan xaaladda caadiga ah. Waxa kale oo u caadi ah dadka qaba cudurka autism in ay leeyihiin xaalado kale, tusaale ahaan; calaamadaha lagu garto cudurrada la kala dhaxlo, cudurka suuxidda ama sarcado loo yaqaan, niyad jab iyo cillad ku timaadda xagga wax isku taxallujinta iyo hawlaha firfircoonida ee aadka u badan. Qof ayaa wuxu qabi karaa cudur ba'an oo autism ah, kaas oo qayb ka ah dhibaatooyin badan oo xagga ruuxda iyo jidhka oo qofku qabo iyo weliba cillad xagga maskaxda oo ba'an oo wadata suuxid ama sarco, sidaas awgeedna arrimahaaso oo dhami ay qofka ka dhigaan mid aan waxba qaban karin.

Ama qofku wuxu noqon karaa mid qaba cudurka autism oo ay cilladdiisu yartahay dabadeed qofku uu noqdo mid waxyaabo badan qabsan kara. Kala duwenaanshaha heerarka dhibaatada ee lagu qeexi karo hannaanka cudurka autism waa mid weyn, waxayaabaha taasi ay ku xidhantahayna waxa ka mid ah, qofnimada gaar ahaaneed, da'da iyo heerka koboca ama koritaanka qofka.

Maxaa la samayn karaa?

Cudurka autism waa mid qofka qaba ka hor joogsan kara hawlihiisa oo curyaan ka dhigi kara inta uu noolyahay. Wakhtigan immika lagu jiro lama garanayo si loo daweeyo cudurka autism. Laakiin haddana, carruur badan oo qabta cudurka autism ayaa aad hore loogu marin karaa oo wax laga qaban karaa isla marka ay aad u yaryihiin. Dadaallo si fiican loo soo qorsheeyey oo rabbaynta ku saabsan oo qofka gaarkiisa loo waafajiyey ayaa ilmaha lagu siin karaan deegaan loogu talo galay. Mid ka mid ah ujeeddooyinka waaweyn ee la leeyahay waxa weeyi in ilmaha laga caawiyo sidii uu hore uga mari lahaa xagga xidhiidhka uu dadka la yeelanayo oo si fiican u shaqaysa. Dadaallada loogu talo galay xagga rabbayntu waa in ay noqdaan kuwa cilmi ku dhisan oo ku saabsan sidii uu wax u baran lahaa ilmaha qaba cudurka autism.

Waxbarashooyinka loogu talo galay aayaha dambe ee sida gaarka ah loo waafajiyey dadka qaba cudurka autism, tusaale ahaan waxa ka mid ah: Hababka kala duwen e baadhitaanka hannaanka lagu dabbaqay ee loo yaqaan (TBAstrategier oo badanaa af-iswidhishka lagu yidhaa) (KBT-kognitiv beteendeterapi) iyo habka kale ee caawinta iyo waxbarashada xagga isgaadhsiinta iyo curyaanimada ee loogu talo galay carruurta qabta cudurka autism ee loo yaqaan (TEACCH-Treatment and Education of Autistic and related Communication Handicapped Children). Cudurka oo hore loo ogaado iyo baadhitaan shay baadh ah ayaa ah tallaabada ugu horraysa. Warbixin buuxda iyo waxbarasho sida ugu deg-deg badan leh loo siiyo waalidiinta iyo dadka kale ee arrintu ay khusayso ayaa ah tallaabada labaad. Arrimahaas iyo dadaal deg-deg ah oo waafaqsan qofka oo aad loo soo qorsheeyey ayaa gun dhig u ah sidii ilmaha loogu caawin lahaa in uu hore u maro mustaqbalka. Waxa sharddi ah oo muhiim ah in carruurta la geeyo dugsi xannaano carruureed iyo dugsi ay dhigtaan oo iyaga si gaar ah loo waafjiyey, sidaas oo kale dadka waaweynna waxa u fiican hoy iyo hawlmaalmeed la waafajiyey. Dhallinyarada iyo dadka waaweyni waxay u baahnaan karaan in loo sii wado dadaallada ku saabsan xagga tarbiyadooda taas oo loola jeedo in mustaqbalka dambe ay kor u qaaddo in ay iskood u madax bannaanaadaan iyo in ay hawlaha jira ka qayb gaataan, xitaa haddii hawlahan hore loo bilaabo. Dadka wax badan qabasan karaa waxay u baahnaan karaan kaalmooyin kala duwen oo ay ku habeeyaan waxbarashooyinkooda iyo in ay fursad u helaan meherado maalmeed kala duwen oo iyaga loogu talo galay.

Inta badan dadka waaweyn ee qaba cudurka autism noloshooda inta ka hadhay waxay u baahan yihiin caawimo iyo taageero aad u weyn. Siday doontaba ha ahaatee hadana dhowr ka mid ah ayaa iskood wax u qaban kara.

Muxuu ka kooban yahay autismspektrumet?

Erayga waa magac guud oo ka wada dhexeeya shaybaadho badan oo cudur oo leh sifooyin badan oo isku mid ah.

Sifooyinka kala duwen ee cudurka autism waa calaamadaha ama sifooyin kala duwen oo ka mid ah bah weynta loo (autismspektrumet) yaqaan. Badanaa waxa lagu soo gaabiyaa magaca autism. Dadka qaba cudurka autism badankoodu waxa kale oo ay leeyihiin cillad xagga maskaxda ah. Laakiin dadka kale ee iyaguba iska caadiga ahi waxay yeelan karaa cudurka autism. Waxaana badanaa loogu yeedhaa cudurka autism ee uu dadku wax badan qabsan karo ama magac ka sii saxsan oo kale oo ah cudurka autism ee haya qof wax badan qabsan kara.

Sifooyinka cudurka Aspergers waxa weeyi cudurka autism ee haya dadka caadiga ah ama dadka leh awood sare oo wax qabad, laakiin aanay haysanin dhibaatooyinka khatarta ah ee xagga luqadda ee uu wato ama lagu yaqaanno cudurka autism

Xaaladaha la midka ah cudurka autism ee, sifooyinka aan la mid ahayn cudurka autism ama cillad weyn oo ku dhacda xagga koritaanka ”UNS” (UNS = utan närmare specifikation) ayaa badanaa loo isticmaalaa isku macno. Shaybaadhadani waxa weeyi in qofku aanu buuxinayn dhammaan calaamadihii ama wixii lagu yaqaanay cudurka ”Asperger”, laakiin haddana ay qofkaasi haystaan dhibaatooyin khatar ah oo la nooc ah cudurrada aan xagga sare ku soo sheegnay.

Ilmaha oo sidii la rabay u kori waaya Waa mid aan badnayn oo dhif-dhif iyo naadir ah, taas oo ah in laba ilaa saddex sano ka dib uu ilmaha ku soo baxayo cudurka autism. Intaas ka hor ilmuhu sida caadiga ah ayuu u koraa.

Immisa qof ayaa qaba cudurka autism?

Weli ma kala cadda inta ay leegtahay tirada dadweynaha ee qabta cudurka autism iyo cilladaha kale ee ay keenaan. Arrin ku salaysan daraasad dulmar ah oo lagu sameeyey cudurkan, ayaa waxa la samayn karaa qiyaastan soo socota. Iswidhan ma jiro wax diiwaan gelin ah oo lagu sameeyey dadka qaba cudurka autism.

Cudurka autism

Waxa lagu qiimayn karaa in ugu yaraan 1-2 carruur ahi ay qabaan cudurka autism.Taas oo ah in Iswidhan ay jiraan ugu yaraan 1500 ilaa 3000 oo carruur ah oo qaba cudurka autism oo da’doodu u dhaxayso 4 -17 sanandood. Gobolka Istokhoom waxay u dhigantaa tirada u dhaxaysa 300 ilaa 600 oo carruur ah.

Dhammaan qaybaha uu ka kooban yahay cudurka autism

Dhammaan qaybaha uu ka kooban yahay cudurka autism waxa lagu qiyaasay in ay tahay ugu yaraan kunkii qofba 6 qof. Iswidhan waxay noqonaysaa qiyaastii 9000 oo carruur ah halka ay gobolka Istockhoom ka tahay qiyaastii 1800 oo iskugu jira carruur iyo dhallinyaro ay

da'doodu u dhaxayso 4 ilaa 17sannadood. Marka laga hadlayo cudurka Aspergers, weli way maqantahay tirada sugani, lakiin waxa weeyi dad ka badan dadka qaba cudurka autism.

Weli ma jirto daraasad sheegaysa inta qof ee waaweyn ee qabta cudurka autism ama xaala-daha kale ee la midka ah cudurka autism.

Tixraacyada

Autism Europe, What is autism?. Link, n28/2003

APA. (2000). Diagnostic and statistical manual of mental disorders. DSM-IV-TR (4th ed., text revision ed.). Washington, DC: American Psychiatric Association.

Fombonne, E. (2003). Epidemiological surveys of autism and other pervasive developmental disorders: an update. J Autism Dev Disord, 33(4), 365-382.

Föreningen Autism: Autism. Vad är det?

Gillberg, C., & Coleman, M. (2000). The Biology of the autistic syndromes (3rd ed. Vol. 153/4). London: Mac Keith Press.

MRC Medical Research Council. (2001). Review of autism research. http://www.mrc.ac.uk/pdf-autism-report.pdf